yar Уow, waxaan ku barayaa erayo, llaahay xifdi wuu ku xifdine, llaahey xifdi hortaadaad ka heliye, markaad wax waydiisanayso llaahay waydiiso, hadii aad cid kaalmaysan llaahay kaalmayso

Ibnu Cabaas Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: "Maalin ayaan Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee gadaashiisa fuushanaa, wuxuu igu yiri: " " yar Уow, waxaan ku barayaa erayo, llaahay xifdi wuu ku xifdine, llaahey xifdi hortaadaad ka heliye, markaad wax waydiisanayso llaahay waydiiso, hadii aad cid kaalmaysan llaahay kaalmayso, ogowna haday ummadda oo dhan isu tagaan si ay wax kuugu taran, kuma tari karaan wax llaahay kuu qoray mooyee, hadii dadka oo dhan isu tagaan si ay kuu dhibaan kuguma dhibi karaan, wax uu llaahay kuu qoray mooyee, kor ayaa loo qaaday qalimadii warqadihiina way qalaleen ".
[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi]

Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu sheegay in isagoo yar uu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee la fuushanaa, markaasa Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku yiri: waxaan ku barayaa arimo iyo waxyaabo llaahay kugu anficidoono: llaahay xifdi, oo ku xifdi inaad ilaaliso wuxuu ku faray iyo inaad ka dheeraato wuxuu kaa reebay, waa inuusan kaa helin meelaha macsida iyo danbiga, hadaad sidaa samayso abaal marintaadu waxay noqonaysaa in llaahay kaa xifdiyo dhibka aduunka iyo kan aakhiroba, kuguna guuleeyo dhamaan waxaad rabto oo dhan halkaad u dhaqaaqdaba. Hadii aad rabto inaad shay waydiisato, ha waydiisan cid aan llaahay ahayn, waayo isaga kaligi ayaa ajiiba kuwa wax waydiista. Hadii aad damacdo in lagu kaalmeeyo cidaan llaahay ahayn ha kaashan. Waa inaad yaqiinsataa inaadan helayn nafac hadii ay dadka dhulka jooga isu tagaan si ay wax kuu taraan kuguma tari karan wax llaahay kuu qoray mooyee. wax dhiba kuguma dhacayo hadii ay isu tagaan dadka dhulka jooga oo dhan si kuu dhibaan kuguma dhibi karaan wax llaahay kuu qaray mooyee. Arinkaan llaahay casa wajala ayaa qoray, wuxuuna ku qadaray sida xikmadiisa iyo cilmigiisu keenayaan, wax badalid ahna laguma samaynayo wax llaahay qoray.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/4811